Su’aalo iyo jawaabo ku saabsan dugsiga barbaarinta

Sidee sameeyaa markaan ilmahayga boos uga doonayo dugsiga barbaarinta ama xarun xannaano?
– Waxaad geleysaa adeegga elektarooniga ah ee barta internet ee degmada oo loogu talagalay xannaanada carruurta oo aad ka heleyso halkaan eskilstuna.se/barnomsorg. Waxaad ku geleysaa hab aqoonsi elektarooni ah (oo lagu magacaabo bank-ID) oo aad ka heleyso bangigaaga.
Haddii aad boos ka codsaneyso degmada Eskilstuna oo ay jiraan waxyaalo aad dooneyso inaad ogaato, waxaad wacaysaa **016-710 10 00.**

Sidee sameeyaa markaan ilmahayga boos uga doonayo dugsiga barbaarinta oo gaar loo leeyahay?
– Dugsiyada barbaarinta oo gaarka loo leeyahay waxay nidaam safka lagu galo oo u gaar ah, markaas dugsiga barbaarinta oo aad dooneyso ayaad toos u la xiriireysaa.

Goormaan ilmahayga safka gelin karaa?
-Ugu horreyn siddeed bilood ka hor marka aad booska u baahan tahay.
Tusaale ahaan haddii aad dooneyso in ilmahaagu dugsiga barbaarinta ama xannaanada ku bilaabo 18 bilood, waxaad kolkaas boos codsan kartaa marka ilmuhu jiro toban bilood.
Ilmuhu waa in uu buuxsado hal sano marka uu bilaabayo dugsiga barbaarinta.

Goormaan ilmahayga boos u helayaa?
-Marka la eego nidaamka safka noo degsan waxaad booska heleysaa haddii aad codsigaaga soo gudbiso ugu yaraan afar bilood ka hor marka aad booska dooneyso.

Boos ma ka codsan karaa dugsiyo barbaarin oo badan?
-Haa oo waxaad dooran kartaa saddex dugsi ama xarun. Taasina waxay fursad dheeraad ah kuu siineysaa inaad midka aad jeceshahay hesho, haddii midkii aad markii hore rabtey kaa buuxsamo.

Boos ma ka heli karaa dugsiga barbaarinta oo aan marka hore doonayo?
-Waxaan ku dadaaleynnaa ilaa inta awooddayada ah sidii aad ku heli lahayd

dugsiga barbaarinta oo aad jeceshahay. Balse mar walba ma suurtagasho in taas la oofiyo. Haddaad dooneyso inaad wax ka ogaato xaaladda safka, booqo barta internetka oo ah eskilstuna.se/forskoleplats

Booqasho mak u tegi karaa dugsiyada barbaarinta oo aan xiiseynayo?
-Haa oo waxaa aad u wanaagsan inaad horay u sii booqato dugsiga barbaarinta oo dooneyso. Toos u la xiriir dugsiga ama dugsiyada barbaarinta oo aad daneyneyso. Habka loo la xiriirayo waxaad ka heleysaa buugyarahaan gadaashiisa iyo weliba barta internet ee eskilstuna.se/forskola

Goormaa la igu wargelinayaa in aan boos helay iyo in kale?
– Hadafkayagu wuxuu yahay inaan jawaab ka bixinno sida ugu dhaqsaha badan.

Immisa ayaan ka bixinayaa booskaas?
-Degmada Eskilstuna waxay leedahay habka sicirka go'an. Waxa ay taasi la micne tahay iyo qiimaha la bixinayo waxaad ka akhrisan kartaa eskilstuna.se/barnomsorg.
Xisaabinta qiimaha waxaa lagu saleeyaa dakhliga qoyska. Khidmadda xannaanada carruurta waxaa la bixiyaa 12ka bilood ee sannadka, oo la micne ah xataa marka ilmuhu ku jiro fasaxa.

Maxaa dhacaya marka ilmo kale ii dhasho?
-Marka ilmo kuu dhasho wuxuu ilmaha weyni raacayaa jadwalkii hore ee dugsiga barbaarinta muddo hal bil ah. Fasaxa waalidnimada inteeda kale wuxuu weyni dugsiga barbaarinta 15 saac toddobaadkiiba. Sida saacadahaas loo qaybinayo waxaad kala tashaneysaa dugsiga barbaarinta.

Ma la ballanqaadayaa in ilmaha yari boos ka helo dugsiga barbaarinta oo uu walaalkiisa/walaashiisa dhigto/dhigato?
-Nidaamka safka sugitaanka iyo khidmaduhu ma leh hab walaalaha mudnaan gaar ah lagu siiyo. Laakiin ilmo walaal weyni ugu jiro dugsiga barbaarinta waxaa la siiyaa tixgelin gaar ah marka la meeleynayo, taas oo ku xiran hadba boosaska bannaan.

Wakhtiyadee furan yihiin dugsiyada barbaarinta iyo goobaha xannaanada degmadu?
– Wakhtiyada aan furanahay waxay yihiin 06.15-18.45 laakiin wakhtiyada ay furan yihiin waxaa la waafajiyaa hadba saacadaha ilmuhu halkaas joogayo iyo shuruudaha dugsiga barbaarinta. Taas oo la micne ah in dugsiyada carruurtu ku yar tahay goor dambe la furo, goor horena la xiro.

Degmadu ma leedahay xarumo xannaano carruur oo saacadaha dambe?
– Haa oo waxaa booskaas lagu bixiyaa baaritaan gaar ah. Waxaan degmooyinka Eskilstuna iyo Torshälla ku leenahay goobo laga qabanqaabiyo hawlahaas.

Maxaa laga sameeyaa dugsiga barbaarinta?
– Dugsiga barbaarintu wuxuu leeyahay manhaj waxbarasho oo leh hadaf la raaco. Habka hawlaha waxbaridda dugsiga barbaarinta loo wado waxaa hoggaamiya xiiseynta iyo wax-ogaanshaha carruurta. Carruurtu waxay ku barataa in cabbirto fekradahooda, oo ku horumariso ku kalsoonaanta awooddooda ay ku xalliyaan, iyo wadashaqaynta carruurta kale iyo waxyaalo kale oo badan.

Waa maxay micnaha laqabsigu?
– Inta lagu jiro wakhtiga laqabsiga wuxuu ilmuhuu ku bartaa in fahmo dugsiga barbaarinta, saaxiibadiisa cusub iyo macallimiinta halkaas jooga. Habka laqabsiga waxaa ilmo walba loo waafajiyaa si gaar ah, sidaas awgeedna wuxuu qaadan karaa wakhtiyo kala duwan. Waalid ahaan waxaad badanaaba ilmaha la joogeysaa qaybo ka mid ah wakhtiga laqabsigu socdo. Dugsiga barbaarinta ilmahaaga kala xiriir sidii aad meel isu la dhigi lahaydeen wakhtiga laqabsiga.

Ilmahaygu ma helayaa caawimaad xagga afka hooyo?
– Waxaan ku dadaali doonnaa inaan ilmaha afka kale ku hadla siinno fursad uu ku horumariyo afka iswiidhishka iyo afkiisa hooyo labadaba. Halkaan ayaad ka akhrisan kartaa warbixin dheeraad ah.

Xeerarka safka iyo khidmadaha oo tifaftiran waxaad ka heleysaa halkaan ***eskilstuna.se/barnomsorg***